

Rubuc qarni loogu dabaaldagayo dadka da'da ah ee Alberta

Ogoosto 28, 2023 [Su'aalaha saxaafadda](#)

Magacaabista Sannadka 2023 ee Abaalmarinaha Adeegga Dadka waaweyn ee Wasaarada waa ay furantahay.

Muddo 25 sanno ah, abaalmarinadan oo lagu abaalmariyay shakhsiyaad, ganacsiyo iyo ururada aan faa'iido doonka ahayn kuwaas oo taageero siiya dadka da'da ah, oo hoggaamiya horumarinta adeegyada la siiyo, kana qayb qaata sidii loo abuuri lahaa bulsho xooggan.

“Dadka da'da ah ee ku sugan guud ahaanba gobolkeena waxay u qalmaan in ay ku noolaadaan nolol wanaagsan oo sharaf iyo ixtiraam leh. Waxaan doonaynaa in aan garowsanno halyeeyadeena iyo kuwa dadka caawiya kuwaas oo naftooda, wakhtigooda iyo tamartooda uhura si loo taageero dadka da'da ah. Dadkaan waxay ka tirsan yihiin bulshadeenna, goobaheena shaqada iyo jaarkeena. Waxay bixiyaan raashin, waxay ka caawiyaan dadka da'da ah sidii ay ku imaan lahaayeen ballamahooda, waxay ka dhigaan bulshadeena mid waxkastaba laga heli karo iyo waxyaabo kale oo badan.”

Jason Nixon, Wasiirka dadka Da'da ah, Adeegyada Bulshada

Sagaal abaalmarin ayaa la gudoonsiin doonaa shakhsiyaadka, ganacsiyada iyo ururada aan faa'iido doonka ahayn. Magacaabista waxaa lagu qiimeeyaa ayada oo lagu salaynayo mutadawacnimada, samafalka, ikhtiraacidada iyo muhiimadda adeegga. Wakhtiga kama danbaysta ah ee magacaabistu waa Noofambar 15. Dadka ku guulaysta ee la xusho waxaa dabaaldag toos ah loo qaban doonaa Maarso 2024.

“Unison waxay leedahay taariikh nus qarni ah marka laga eego u adeegidda iyo la shaqaynta dadka waaweyn ee da'da ah ee bulshadeenna. Waxaanu ognahay sida ay dadka da'da ah muhiimka ugu yihiinguusha iyo badqabka bulshada gobolkaan wanaagsan. Waxaan si weyn ugu faraxsannahay in Dowladda Alberta ay wakhti ku bixinayso aqoonsiga iyo u tahniyadaynta dadka waaweyn kuwaas oo ka gudbay caqabadihii horey loo aaminsanaa kuna keenay isbadal dhab ah nolosha dadka kale.”

Larry Mathieson, madaxweynaha iyo guddoomiyaha, Unison

“Dadka da’da ah waxay muhiim u yihiin horumarka iyo mustaqbalka gobolkeenna. United Way waxay si dhow ula shaqaynaysaa Dowladda Alberta Healthy Aging Alberta – oo ah hay’ado ka shaqeeya adeegga dadka da’da ah, xulafo iyo dadka da’da ah laftoodaba si ay Alberta uga dhigto mid kamid ah goobaha ugu wanaagsan dunida ee uu qofku ku gaboobi karo. Waxaan rajaynaynaa aqoonsiga dadka mutaystay abaalmarinta sannadkan iyo sii wadida inaynu ka wada shaqaynu sidii aynu u abuuri lahayn mustaqbal u wanaagsan qof walba.”

Karen Young, madaxweynaha iyo guddoomiyaha, United Way of Calgary and Area

Xaqiiqooyin kooban

- Dadka reer Alberta waxay cidda ay magacaabayaan kusoo gudbin karaan si onleen ah, ayaga oo kusoo diraya iimaylka iyo boostada. Wax badan ka ogow oo qof magacow maanta.
- Ilaa 1998, Abaalmarinaha Adeegga dadka waaweyn ee Wasaaradda waxaa lagu abaalmarayay 181 shakhsi iyo ururo khayri ah oo u shaqeeya dadka da’da ah.

Macluumaadka la xiriira

- [Abaalmarinaha Adeegga Dadka waaweyn ee Wasaaradda](#)

Su’aalaha saxaafadda

Heather Barlow

780-245-0421

Xoghayaha Saxaafadda, Dadka Da’da ah, Adeegyada Bulshada